FAAFINTA RASMIGA

الرسمية الجريدة

# DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA
لولاية أرض بونت الصومال

**Sanadka 16.5-aad. Garowe 05 January, 2015** **Lam.1**

**Faafinta bil walba soo baxda** جريدة الشهرية

***Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland***

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

## TUSMADA

**Qaybta Koowaad**

**Ansixinta Xeerka Guddiga Doorashooyinka Puntland**

**Qaybta labaad**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

**Waxba ma leh**

***Sharci Lr 9. ee 05/01/2015, kuna saabsan Ansixinta Xeerka Guddiga Doorashooyinka Puntland***

DOWLADDA PUNTLAND
. EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

**Sharci Lr. 9 ee January 06, 2015, kuna saabsan ansixinta Xeerka Guddiga Doorashooyinka Puntland**

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPLS/139/2014 ee 31/12/2014;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.

## Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

### Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Xeerka Guddiga Doorashooyinka Puntland

### Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

### Qodobka 3-aad

Dhaqangalka xeerkani wuxuu noqonayaa marka Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

**Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

ولاية بو نت لاند الصومال

**GOLAHA WAKIILADA**

مجلس النواب

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

***Ref:*- XGGW/DPL/139 /2014** **Garoowe, Arbaco** Date:-**31/12/2014**

**Ku:- Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

Ujeeddo:- **Ansixinta Xeerka Guddiga Doorashooyinka Puntland**

**Guddoommiyaha Golaha Wakiilladdu:-**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY:- | Dastuurka DPL Qodobkiisa **64-aad** |
| MARKUU ARKAY:- | Soo gudbinta Madaxweynaha DPL Ref **MW/DPS/902/2014** ee **1 December 2014** kuna saabsan Xeerka Guddiga Doorashooyinka Puntland. |
| MARKUU TIXGELIYEY:- | Baahida loo qabo Ansixinta Xeerkan |
| MARKUU DHEGAYSTAY:- | Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada ku Ansixiyey **09/12/2014** xeerka Guddiga Doorashooyinka Puntland |

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Xeerka Guddiga Doorashooyinka Puntland.**

***GUUL EEBBE***

***Md. Siciid Xasan Shire***
***Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL***

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بو نت لاند الصومال

# XEERKA GUDDIGA DOORASHOOYINKA PUNTLAND "GDP"

# {PUNTLAND ELECTORAL COMMISSION LAW)

## *DECEMBER, 2014*

# DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

# XEERKA GUDDIGA DOORASHOOYINKA

# PUNTLAND (GDP)

## *(Puntland electoral commission law)*

---

## Qodobka 1aad

## Macneyn

1. GDP xuruuftaan waxay u taagan tahay Guddiga Doorashooyinka Puntland

## Qodobka 2aad
## Xaalad-qaanuuneedka Guddiga Doorashooyinka Puntland

1. Guddiga Doorashooyinka Puntland (GDP) waa hay'ad dan guud oo leh madax-bannaani-maamul, mid maaliyadeed iyo ka go'aan-gaaris hawlaha loo idmaday.
2. Guddiga Doorashooyinku wuxuu u hogaansan yahay ku dhaqanka shareecadda islaamka, dastuurka iyo xeerarka kale ee dawladda Puntland oo keliya.

## Qodobka 3aad
## Guddiga Doorashooyinka ee ku-meelgaarka ah

1. Guddiga Doorashooyinka Puntland ee Kumeel-gaarka ah wuxuu ka kooban yahay 9 (sagaal) xubnood oo isugu jira Shan (Shan) madaxweynuhu so magacaabo Golaha Wakiilladuna ansixiyo iyo afar (4) xubnood oo Golaha wakiilladu soo sharraxo ka dibna ansixiyo.
2. Guddigu wuxuu u xilsaaran yahay qabashada Doorashooyinka Golayaasha Deegaanka ee ugu horeeya xilkooduna wuxuu ku egyahay ku dhawaaqidda natiijooyinka doorashada gollayaasha deegaanka iyo qaynuunaynta xisbiyada siyaasadda.

3. Inta lagu jiro muddada xil-hayntiisa Guddiga ku-meel-gaarka ahi wuxuu leeyahay awoodaha ku cad xeerkan.
4. Marka ay dhammaato xil-hayntiisa Guddiga Doorashooyinka Puntland ee ku-meel-gaarka ah, waxaa la magacaabayaa Guddiga Doorashooyinka Puntland ee rasmiga ah si waafaqsan qodobka 112-aad ee Dastuurka iyo sida ku xusan lifaaqa koowaad ee isla Dastuurka Puntland.

## Qodobka 4aad
## Habka magacaabidda iyo Xulashada Guddiga Doorashooyinka Rasmiga ah

1. Sida ku cad qodobka 113-aad, farqadiisa 1-aad xarafka(x) ee dastuurka dawladda Puntland wuxuu Golaha wakiilladu ansaxinayaa xubnaha Guddiga Doorashooyinka ee rasmiga ah oo ka kooban sagaal xubnood oo kala noqonaya sidan:

    b. Seddex (3) xubnood oo uu soo magacaabayo Madaxweynaha Dawladda Puntland

    t. Seddex (3) xubnood oo uu soo magacaabayo Golaha wakiilladu

    j. Seddexda xisbi oo mid waliba soo magacaabayo hal (1) xubin

2. Guddoomiyaha Golaha Wakiillada ayaa sedex bilood ka hor ku dhawaaqaya waqtiga loo mudeeyey ansixinta xubnaha Guddiga Doorashada Puntland ee rasmiga ah

## Qodobka 5aad
## Shuruudaha Xubinnimada GDP

Qof kasta oo ka mid noqonaya Guddiga Doorashooyinka Puntland waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda:

1. Waa inuu yahay muwaadin u dhashay Puntland.
2. Waa inuu yahay Muslim ku dhaqma diinta Islaamka.

3. Waa in aynan da'diisu ka yarayn 40 (afartan) sano.
4. Waa inuu leeyahay ugu yaraan aqoon dugsi sare iyo khibrad maamul ee muddo 5 (Shan) sano ah.
5. Waa in uu ku leeyahay bulshada dhexdeeda anshax wanaagsan iyo dhawrsanaan.
6. Waa in aan 5-tii sano ee u dambaysay wax dambi culus ah maxkamadi ku xukumin.
7. Waa inuu maskax ahaan fayow yahay uuna gudan karo waajibaadkiisa.
8. Waa in uusan ka mid ahayn shaqaalaha Dawladda, xubnaha Golaha wakiillada, xubnaha Golaha wasiirada, Ciidamada Qalabka sida iyo Hay'adda Garsoorka.

## Qodobka 6aad

## Xarunta Guddiga Doorashooyinka Puntland

Xarunta dhexe ee Guddiga Doorashooyinka Puntland waa magaalo-madaxda Dawladda Puntland ee Garoowe.

## Qodobka 7aad

## Fadhiga Kowaad ee GDP

Guddiga Doorashooyinka Puntland wuxuu fadhigiisa koowaad ee ugu horeeya iska dhex dooranayaa Guddoomiye iyo Guddoomiye ku-xigeen.

## Qodobka 8aad

## Awoodaha iyo xilalka Guddiga Doorashooyinka Puntland

Awoodaha iyo xilalka Guddiga Doorashooyinka Puntland waa sidan soo socota:

1. Abaabulka iyo agaasinka doorashooyinka Golaha wakiillada, Gollayaasha Deegaanka iyo wixii kale ee xeerku amrayo.

2. Magacaabidda hawlwadeennada xafiisyada doorashooyinka gobollada, degmooyinka iyo goobaha codbixinta.
3. Diyaarinta jaangoynta qorshaha guud ee doorasho kasta iyagoo hawlaha doorashada ku tifatiraya, kharashyada lagu daboolayo miisaaniyadda gaarka ah iyo xaqiijinta helitaankeeda, waxaana la keenayaa jaangoyntaas iyadoo laga dooday lagalana xiriiray mas'uuliyiinta dawladda iyo xisbiyada ay khuseyso.
4. Ilaalinta amniga doorashooyinka iyagoo adeegsanaya ciidamada amniga.
5. Maareynta iyo xallinta is-qabadyada iyo dacwooyinka ka dhasha hannaanka doorashooyinka oo ku kooban arrimaha maamulka doorashooyinka. Wixii khilaafaad ah ee natiijada doorashada ka yimaada waxaa looga caban karaa Maxkamadda Sare oo awood u leh qaadista dacwadaha idaariga ah.
6. Sharxidda iyo fahamsiinta codbixiyeyaasha qaabka codbixinta iyo hannaanka doorashooyinka.
7. Ganaaxyo maamuleed oo la saaro xisbiyada amase muwaadiniinta ku xad-gudubta hawlgalka doorashooyinka.
8. U gudbinta xafiiska xeer-ilaalinta xadgudubyada xeerarka doorashooyinka ee leh dabeecad dembi si ay u oogto dacwad.
9. Tilmaamidda iyo caddeynta tirada iyo meelaha noqonaya goobaha codbixinta iyo xarumaha laga codaynayo ee doorashooyinka Puntland, iyadoo lala tashanayo Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Aminiga.
10. Diyaarinta iyo maamulidda hawlaha socda ee diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha ee markaas ku jiray diiwaanka guud ee cod-bixiyayaasha.
11. Go'aaminta wakhtiga doorashooyinka la qabanayo, iyagoo Madaxweynaha u gudbinaya si uu dekreeto ugu soo saaro.
12. Ku dhawaaqidda natiijada ku meelgaarka ah, iyagoo raacaya hababka uu dejiyey xeerka doorashooyinka.
13. Waa inuu sideed (8) beri gudahood ka dib ku dhawaaqidda natiijada doorashooyinka uu siiyo caddayn qoraal ah ciddii ku guuleysatey doorashada, hadduu sidaas ka baaqdo guddigu waxaa ku filan ku dhawaaqiddii natiijada ciddii la doortay.

14. Joojinta qayb ahaan ama dhammaan doorasho degmo ama gobol markasta oo ay dhacaan dhacdooyin lama-filaan ah ama ay dhacaan is-beddelo la xiriira nadaamka guud oo sababa in la hirgelin waayo. Marka ay meesha ka baxdo sababtii joojinta keentay, Guddiga Doorashooyinka Puntland ayaa go'aaminaya maalinta sii wadidda hawlihii Doorashada ee hakaday, kaddib marka uu la tashado hay'adaha dawliga ah oo ay arrintu khuseyso iyo xisbiyada siyaasadeed.
15. Diiwaangelinta xisbiyada, iyadoo loo eegayo xeerka loo dejiyey.
16. Haynta diiwaanka dhammaan ururada iyo xisbiyada siyaasadda ka qayb gala doorasho kasta iyo qaabka isbahaysigooda.
17. Haynta diiwaanka dhammaan musharixiinta loo soo gudbiyo iyo kuwa loo ogolaado ka qayb-gelidda doorasho kasta.
18. Xallinta isqabadyada xisbiyada dhexdooda, markasta oo Guddiga Doorashooyinka Puntland la waydisto in uu faragelin Xeer ku sameeyo is-hayntooda.
19. Kor ka-ilaalinta hawlaha xisbiyada siyaasadda gaar ahaan u hoggaansanaanta xeerka doorashooyinka iyo xeer-hoosaadyadooda. Wixii is-qabad maamul ah ee ka dhasha faqradan iyo labada faqradood ee ka horeeya ka go'aan qaadashadooda Kama qayb-qaadaneyso xubinta Guddiga Doorashoyinka ee ka socota xisbiga arrinku khuseyso.
20. Abaabulidda iyo isu-dumidda waaxaha kala duwan ee lagama maarmaanka u ah hawlaha doorashada iyo magacaabidda, ganaaxidda, beddelidda iyo shaqo ka Saaridda shaqaalaha ay u xilsaareen hawlahaas.
21. Soo diyaarinta Miisaaniyadda dhacdo kasta ee doorasho si loogu maamulo hawlaha doorashooyinka, iyadoo la horgeynayo Golaha Xukuumadda lagana ansixinayo Golaha Wakiillada.
22. Miisaaniyadda doorashooyinka wuxuu Guddigu u isticmaalaya Si madax bannaan, iyadoo ay waajib tahay in xisaabcelin saddex billoodle ah uu u gudbiyo hanti-dhawrka guud ee dawladda Puntland.
23. Sharxidda warbixin-sanadeedka hawlgalka iyo warbixin gaar ah ee ku Saabsan dhacdo kasta ee doorasho.

## Qodobka 9aad

## Qaab-Dhismeedka GDP

Qaabdhismeedka Guddiga Doorashooyinka Puntland waa sidan soo Socota:

1. Guddiga Doorashooyinka Punltand waxa ay awoodiisa ku fidsan tahay dhulka Dawladda Puntland oo dhan, waxaana hoggaaminaya xubnaha Guddiga Doorashooyinka Puntland.
2. Gobol kasta wuxuu yeelanayaa hal xafiis doorashooyin heer gobol ayna hoggaaminayaan hawlwadeennada doorashooyinka gobolka.
3. Degmo kasta waxay yeelaneysaa hal xafiis doorashooyin ee heer degmo ayna hogaaminayaan hawlwadeennada doorashooyinka degmada.
4. Tirada is-bedbedaleysa ee goobaha codbixinta ee ay hoggaaminayaan hawl-wadeennada goobaha codbixinta, Lana dejiyey meelo kala duwan ee dhulka Dawladda Puntland, iyadoo loo eegayo qaybinta dadweynaha.

## Qodobka 10aad

## Luminta Xubinnimada Guddiga Doorashooyinka Puntland

1. Xubinnimada Guddiga Doorashooyinka Puntland waxaa lagu waayi karaa marka ay sugnaato mid ka mid ah sababaha hoos ku qoran:

    b. Xubinta oo lumisa mid ka mid ah shuruudihii lagu soo doortay.

    t. Xubinta oo gudan Kari weyda xilkeeda sabab kasta ha ku timaadee.

    j. Xubinta oo Geeriyoota

    x. Xubinta oo istaqaalo keenta lagana aqbalo.

    kh. Xubinta oo ku xad-gudubta Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo qawaaniinta kale ee dawladda Puntland.

    d. Xubinta oo maxkamadi ku xukunto fal-dembiyeed culus.

2. Xaaladaha ku xusan faqradda koowaad ee isla qodobkan xarfaha (b,t,kh iyo d), waxaa ku dacweyn Kara xubnaha Guddiga Doorashooyinka Puntland muwaadin ama koox kasta oo u aragta inay ku sifoobeen xaaladahaasi, iyaga oo u gudbinaya qoraal durid ah hay'adaha Garsoorka.

3. Haddii xubin ka mid ah guddiga doorashada Puntland ay ku caddaato inay jabisey mid ka mid ah shuruudaha ku xusan faqradda koowaad ee isla qodobkan xarfaha (b, t, kh iyo d), waxaa soo eedaynaya xeer-ilaaliyaha guud wuxuuna horkeenaya Golaha Wakiillada eedeyntiisa. Marka Goluhu ku qanco eedeyntaas waxaa xasaanadda looga qaadayaa cod hal dheeri ah.
4. Haddii xubin/xubno Guddiga Doorashada ka mid ah ay makaankeeda banneyso/banneeyaan, sababo la xiriira eryid, shaqo ka joojin, dhimasho, istiqaalad ama sabab kalaba, waxaa makaankaas loo buuxinayaa si waafaqsan habraacii lagu soo xulay xubinta/xubnaha meesha ka baxday/ baxay markii la magacaabay, waxayna xilka hayneysa/haynayaan muddada ka harsan xilhaynta.

## Qodobka 11aad

## Awoodda iyo Mas'uuliyadaha Guddoomiyaha GDP

Guddoomiyaha Guddiga Doorashooyinka Puntland, wuxuu yeelanayaa awoodaha iyo mas'uuliyadaha soo socda:

1. Inuu isugu yeero xubnaha kale ee GDP fadhiyada caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn.
2. Inuu diyaariyo isaga oo la kaashanaya Xoghayaha Guud, ajendaha fadhiyada shirka GDP.
3. Inuu guddoomiyo, hogaamiyana shirarka GDP.
4. Guddigu wuxuu go'aamadiisa ku gaarayaa cod hal dheeri ah, haddii ay coddeyntu isleekaato laba jeer waxaa mar saddexaadka cod dheeri ah yeelanaya guddoomiyaha guddiga.
5. Inuu hogaamiyo maamulka hay'adda doorashooyinka, isaga oo go'aan ka gaaraya dhammaan arrimaha aan gaar u ahayn GDP.
6. Inuu hawlgeliyo ciidamada booliska ee la hoos geeyey, marka ay doorashooyinka socdaan si ammaanka guud loo Sugo, kadib marka ay isla gartaan taliyaha ciidanka booliska, wasaaradda amniga iyo wasaaradda arrimaha gudaha.

7. Inuu wakiil qaynuuneed uga noqdo Guddiga Doorashooyinka arrimaha dacwadaha iyo inuu yahay wakiilka qaynuuniga ah ee xiriirka hayaddu la leedahay qaybaha kale ee Dowladda Puntland, axsaabta siyaasiga iyo bulshada rayidka. Xilkan waa loo wakiilan karaa xubin kasta oo guddiga ka mid ah, waxaana go'aankeeda leh shir guddoomiyaha ama go'aan wadareedka GDP.
8. Inuu kormeero, dushana ka ilaasho habsami iyo hawl-karnimo u shaqaynta dhammaan shaqaalaha xafiisyada doorashooyinka hay'adaha hoos yimaada. Guddiga Doorashooyinka wuxuu go'aamin karaa sida ay xubnihiisu u qaybsadaan hawlaha iyo masuuliyadaha.
9. Dhammaan awoodaha iyo mas'uuliyadaha kale ee xeerarka doorashooyinku u jideeyeen guddoomiyaha.

## Qodobka 12aad

## Qaabdhismeedka maamul hoosaadka GDP

1. Si uu u fuliyo waajibaadkiisa, GDP wuxuu leeyahay madaxbannaani shaqo, waxaana Guddiga hoos imanaya waxaaha soo socda:

    B) Xoghayaha Guddiga.

    T) Waaxda Diiwaanka Codbixiyayaasha.

    J) Waaxda Maamulka.

    X) Waaxda Maaliyadda.

    Kh) Waaxda qaynuunka.

2. Xafiis kasta oo ka mid ah kuwa ku xusan faqradda 1aad ee isla qodobkan, waxaa loo unkayaa, ayada oo la tixraacayo baahida habraaca doorashooyinka iyo haynta hantida GDP.
3. Marka laga reebo Xoghayaha guud ee GDP oo shuruudaha laga xulanayo ku cad yihiin qodobka 14aad ee isla xeerkan, xafiis kasta waxaa madax ka noqonaya qof Guddigu u xilsaaro oo reer Puntland ah, isaga/iyada oo isticmaalaysa xuquuqdisa/ deeda siyaasadeed, aanay da'diisu/deedu kayarayn 25 (shan iyo labaatan) sano oo aqoon xirfadeed iyo waayo aragnimo (khibrad) u leh jagada loo magacaabayo oo aan xiriir xigto la lahayn xubin Guddiga Doorashada ka mid ah ilaa 4 (afar) darajo ama

labo darajo dhanka xididnimada.

4. Iyada oo lagu salaynayo koboca Guddiga Doorashooyinka Puntland iyo baahida loo qabo horumarinta Dimuqraadiyadda dalka, Guddiga Doorashooyinka Puntland wuxuu aasaasi karaa waaxyo kale oo uu ku fuliyo mas-uuliyadiisa.

## Qodobka 13aad

## Xafiiska Xoghayaha Guud ee GDP

1. Hawlaha Xafiiska Xoghayaha Guud ee GDP, waxaa fulinaya Xoghayaha Guud ee Guddiga Doorashooyinka Puntland, Guddiga ayaana u magacaabaya xilkaas. Jagada loo magacaabo wuxuu qabanayaa, kadib marka uu Guddiga hortiisa ku maro dhaarta ku xusan qodobka 132aad ee Dastuurka Puntland.
2. Dhammaan go'aamadda GDP soo saaro waxaa wax ka saxiixaya Xoghayaha Guud. Kaaliye xoghaye guud oo guddiga doorashadu magacaabo ayaa beddelaya marka uu xoghayaha guud maqan yahay ama uu gudan Kari waayo xilkiisa.

## Qodobka 14aad

## Shuruudaha Magacaabidda Xoghayaha Guud ee GDP

1. In uu yahay muwaadin Puntland, muslim ah gutana waajibaadka diiniga ah
2. In aan da'diisu ka yarayn 35 sano
3. In uu leeyahay dhaqan wanaagsan iyo karti xil gudasho oo hawshiisa la xiriirta
4. In uu haysto shahaado jaamacadeed oo la aqoonsan yahay
5. In uu leeyahay waayo aragnimo shaqo oo aan ka yarayn 5 sano
6. In uu labadii sano ee ugu dambeeyey ku sugnaa dalka Puntland
7. In aan xuquuqdiisa maxkamadi laalin shantii sano ee ugu dambeysay

## Qodobka 15aad

## Awoodaha iyo Mas'uuliyadda Xoghayaha Guud ee GDP

Xoghayaha Guud wuxuu yeelanayaa awoodaha iyo masuuliyadda soo socota:

1. In uu si wanaagsan oo nidaamsan u xafido dhammaan waraaqaha dukumentiga qaab qaynuuneedka ah ee GDP, kuna xafido galalka khuseeya arrimaha Guddiga la horkeenayo si uu u darso.
2. In uu diwaagaliyo wax qabadyada iyo go'aannada guddigu Soo Saaro iyo inuu dhammaantood ka helo saxiix, mar haddii ay oggolaadaan go'aannada.
3. In uu joogo dhammaan fadhiyada shirarka GDP, uuna doodooda ka qayb-galo markasta oo loo baahdo ama xubin guddiga ka mid ahi aragtidiisa weydiiso. Xoghayaha Guud malaha awood codbixineed.
4. In uu saxiixiisa ku meel mariyo waxqabadka iyo go'aanada uu gaaro Guddiga Doorashooyinka Puntland.
5. In uu gaarsiiyo cidda ay khuseyso ama danaynaysa dhammaan go'aannada Guddiga ama dhinacyada ku lug leh iyo inuu qaybiyo dhammaan arrimaha loo baahan yahay si loo socodsiiyo hawlaha GDP.
6. In uu qabto codsiyada rasmiga ah (Petition) iyo araajida ay Guddiga u soo gudbiyaan axsaabta siyaasadda, xukuumadda ama muwaadiniinta isaga oo saxiixaya taariikhda loo keenay.
7. In uu hoggaamiyo, iskuna dubbarido hawlaha waaxyaha kale ee xafiiska Guddiga Doorashooyinka Puntland.
8. Dhammaan waxyaabaha kale ee ku qeexan xeerkan ama uu GDPu xilsaaro.

## Qodobka 16aad

## Diwaanka Cod-bixiyeyaasha

1. Diwaanka cod-bixiyeyaasha waa diiwaan guud oo ay ku jiraan aqoonsiga dhammaan dadka Puntland, kuwaasoo ah muwaadiniinta gaaray da'da codbixinta, lehna kaarka aqoonsiga muwaadinka Puntland (state ID) .

2. Diwaanka cod-bixiyeyaasha diyaarintiisa iyo xafidaadiisa waa xilka Guddiga Doorashooyinka Puntland. Xeer u gaar ah ayaa go'aaminaya dhammaan arrimaha la xiriira diiwaanka.

## Qodobka 17aad

## Waaxda Maamulka & Shaqaalaha

Waaxda Maamulka iyo shaqaalaha waxaa hogaaminaya agaasimaha waaxda maamulka iyo shaqaalaha ee Guddiga Doorashooyinka Puntland, hawlahiisa u gaarka ahina waa sida soo socota:

1. Waa mas'uulka loogu talagalay maamulka ku Saabsan Guddiga Doorashooyinka Puntland iyo inta hoos tagta oo idil.
2. Waa mas'uulka ugu dhow xilka shaqaalaha hay'adda doorashooyinka, si toos ahna warbixin uga siiya guddoomiyaha Guddiga Doorashooyinka Puntland.
3. Wuxuu diyaarinayaa qorshaha guud ee loogu tala galay doorasho kasta, waana in uu Si qeexan ugu xiro hawlaha siday isugu xig-xigeen iyo muddada lagama maarmaanka ah ee loogu tala galay mid kasta, ka dibna horgeeyo Guddoomiyaha GDP.
4. Wuxuu siinayaa warbixin xilliyeed Guddiga, warbixinadaas oo ku Saabsan xaaladda la xiriirta hawlaha maamulka Guddiga Doorashooyinka Puntland iyo wixii soo jeedin ah ee lagu sii hagaajinayo.
5. Dhammaan hawlaha u gaarka ah ee kale ee uu u xil-Saaro xeerka doorashooyinka amase Guddiga Doorashooyinka Puntland.

## Qodobka 18aad

## Waaxda Maaliyadda

Waaxda maaliyadda waxaa hogaaminaya maamulka waaxda maaliyadda, waajibaadyadiisa ugu muhimsanna waa sidan:

1. Qorshaynta, abaabulidda iyo isku-dubbaridka maaliyadda Guddiga Doorashooyinka Puntland.
2. Maamulidda, hubinta qaynuunimada, ku habboonaanta iyo diwaan-galinta dhammaan hawl-fulinta maaliyadeed, si waafaqsan xeerka iyo

nidaamyada hawlaha maamulka la xiriira ee Guddiga Doorashooyinka Puntland farayo.

3. Gudashada hawlaha lagama maarmaanka ah, diyaarinta kharashyada loogu talo galay hawl socodsiinta Guddiga Doorashooyinka Puntland ee Waqtigaas taagan.
4. Diyaarinta dokumentiga lagama maarmaanka ah ee maaliyadda iyo inuu furo xisaab socota ee Bangi oo loogu talo-galayo helidda deeqaha Guddiga Doorashooyinka uga yimaada hay'adaha caalamiga ah ee deeqaha bixiya, xukuumadda amaba ilo kale ee qaynuuni ah.
5. Sharxidda qorshaha loogu tala galay miisaaniyadda caadiga ah iyo tan aan caadiga ahayn ee Guddiga Doorashooyinka Puntland iyo hor-gayntooda guddoomiyaha Guddiga.
6. Dhammaan amarrada iyo xilalka kale ee xeerka iyo xeer-hoosaadyada Guddigu ay farayaan.

## Qodobka 19aad

## Waaxda Qaynuunka

Waaxda qaynuunka waxaa hogaaminaya qaynuun yaqaan la taliya Guddiga Doorashooyinka Puntland wuxuuna leeyahay xilalka soo socda:

1. La talinta GDP xagga qaynuunimada go'aannadooda.
2. Diyaarinta rayi xeer marka GDP ka xaajoonayo arrimaha doorashooyinka, soo jeedinta qaynuuneed ee garyaqaanku u soo jeediyo GDP haddii la diido waxaa la gelinayaa galka dacwadaha rasmiga ah.
3. Diyaarinta hindise-xeereedka ku saabsan wax ka beddelka xeerarka doorashooyinka, kaasoo GDP u gudbinayo Golaha xukuumadda kaddibna looga ansixiyo Golaha Wakiillada Dawladda Puntland.
4. Masuuliyadda dacwadaha loo gudbinayo maxkamadda iyo dacwadda GDP ku Soo oogo xubin ka mid ah isla Guddiga oo lagu eedeeyey dembi ciqaab ah isagoo ku gudo jira gudashada xilkiisa.
5. Awoodaha iyo xilalka kale ee uu xeerku siiyo.

## Qodobka 20aad

## Habka Fadhiyada Guddiga Doorashooyinka Puntland

1. Guddiga Doorashooyinka Puntland wuxuu xaruntiisa ku qabanayaa shir caadi ah ugu yaraan toddobaadkiiba hal mar.
2. Kooramka shir/fadhi kasta ee Guddiga Doorashooyinka Puntland looga baahan yahay waa 5 (Shan) xubnood, go'aannadiisuna waxay ku ansaxayaan cod hal dheeri ah.
3. Aqlabiyadda GDP marka ay la tahay inuu jiro arrin u baahan in si deg-deg ah looga xaajoodo waa inay guddoomiyaha ka codsadaan in uu shir aan caadi ahayn abaabulo, isuguna yeero xubnaha Guddiga. Guddoomiyaha waxaa ku waajib ah in shirkaas ku abaabulo kuna qabto muddo dhan 48 saac gudahood, kaddib marka codsiga aqlabiyadu soo gaaro.
4. Habka-Socodsiinta hawlaha Shirka/fadhi kasta waa sidatan:
   - b. Xaqiijinta in kooramku dhan yahay
   - t. Guddoomiyaha oo ku dhawaaqa inuu shirku furan yahay
   - j. Oggolaashaha ajendaha (Mowduuca) la soo jeediyey in fadhigaas lagaga doodo.
   - x. Oggolaanshaha hadal-qoraalka fadhigii hore iyo saxiixyadooda dhammaan xubnaha
   - Kh. Ka doodidda iyo go'aaminta arrin kasta oo lagu oggolaaday fadhiga maalintaas.
5. Ajendaha waxaa diyaarinaya Guddoomiyaha, laakiin xubin kasta way Soo jeedin kartaa qodob cusub oo laga doodo haddii ay aqlabiyaddu oggolaato sidaas.
6. Haddii xubin guddigaas ka mid ahi diidan tahay go'aanka aqlabiyaddu isku raacday, waxay codsan kartaa in diidmadeeda la geliyo diiwaanka rasmiga ah.
7. Guddigu Wuxuu ku qoraya diiwaanka rasmiga ah ee Shirarka xogta ku Saabsan ajendaha fadhiyada, ayada oo fadhi kasta la qorayo ama la diiwaangalinayo xogta ku Saabsan ajendaha fadhiga, nuxurka doodaha

iyo go'aannada guddigu gaaro ama uu Soo Saaro. Xoghayaha Guud ee GDP ayaa mas'uul ka noqonaya gacan ku haynta Diwaanka iyo saxiix ka helidda xubin walba oo ka mid ah GDP.

8. Xoghayaha GDP wuxuu go'aanadda guddiga si ramsi ah oo qoraal ah u gaarsiinayaa cidda ay khuseeyaan.

## Qodobka 21aad

## Dhaarta

1. Xubnaha Guddiga Doorashooyinka Puntland waxaa mid kasta lagu dhaarinayaa dhaarta ku xusan qodobka 132aad ee Dastuurka Puntland, taas oo ah sidatan: "Waxaan ku dhaaranayaa magaca llaahay, in aan ku dhaqmo diinta Islaamka, Dastuurka dalka Puntland iyo qawaaniintiisa dhawro, xilka la ii dhiibay daacadnimo u guto, dalka iyo dadkiisana Lillaahi ugu adeego" waxaa dhaarinaya garsoore ka tirsan maxkamadda Sare, ayada oo lagu hor dhaarinayo Madaxweynaha Dawladda Putnland.
2. Hawl-wadeennada Xafiiska Doorashooyinka Puntland ee heer Gobol, heer Degmo iyo kuwa goobaha codbixinta, waxaa lagu hordhaarinayaa xubin ka mid ah Guddiga Doorashooyinka Puntland isla dhaarta ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan 21-aad ee isla xeerkan, waxaana dhaarinaya garsoore ka tirsan Maxkamadda darajada Koowaad ama Maxkamadda Racfaanka.

## Qodobka 22aad

## Xasaanadda GDP

1. Xubnaha Guddiga Doorashooyinka waxay leeyihiin xasaanad muddada ay xilka hayaan, xasaanad ka qaadidooda waxaa loo marayaa hab waafaqsan Dastuurka DPL.
2. Hawl-wadeennada kale ee Xafiisyada Doorashooyinka ee heer Gobol, heer Degmo iyo kuwa goobaha codbixinta waxay leeyihiin damaanadqaad qaynuuneed lama xiri karo muddada ay socdaan hawlaha Doorashooyinku, iyadoo aan oggolaansho laga helin Guddiga Doorashooyinka Puntland ama aan lagu qaban iyagoo dambi culus faraha kula jira.

## Qodobka 23aad

## Ku dhawaaqidda Maalinta Doorashada

Madaxweynaha Dawladda Puntland ayaa si rasmi ah ugu dhawaaqaya taariikhda hay'adda doorashadu u asteysay maalinta la qabanayo doorashada, asaga oo isla markaana ku soo Saaraya dekreeto, taas oo lagu cayimayo amminta (waqtiga), maalinta iyo taariikhda la qabanayo doorashada.

## Qodobka 24aad

## Dhaqan galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan gal noqonayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, madaxweynaha Dawladdu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

## Qodobka 25aad

## Burin

Waxaa la buriyey xeer kasta oo aan la socon Karin amase ka hor imanaya xeerkan.

**Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**